


# URUR SIYAASADEEDKA MUSTAQBAL

## Qeexidda Warbixinta Ururka.

## The Organizational Profile

**Address**: Garoowe, Nugaal. **Email**: mustaqbalparty2020@gmail.com. **Tell**: 0906795674.

**ARAR**

Ururka Mustaqbal waa urur ka mid ah ururada cusub ee ka hanaqaaday dawlad goboleedka Somaaliyeed ee Puntland. Sida magaca ururku tilmaamayo, ururku wuxuu u dhismay sidii mustaqbal ka wanaagsan kan maanta ummaddu ku jirto loogu horseedi lahaa dadka Soomaaliyeed, gaar ahaana kuwa ku dhaqan degaannada uu ururku ka hawl galo ee Puntland.
Barnaamijka uruku waa uu ka duwan yahay kan ururada kale. Sida magacu tilmaamayona hiigsiga iyo hillaadinta ururku waa in la helo maamul suuban oo u adeega dadka iyo dalka.
Barnaamijka ururku wuxuu ku salaysan yahay siyaasad Dhaqan Dhaqaale oo aysan qayb yar oo bulshada ka mid ihi gaar ugu intifaacsan, sida hadda jirta, laakiin ay bulshadu u siman tahay.

Awoodda ururka iyo Barnaamijka-kiisuba waxey ka imaanayaan xubnaha ururka iyaga ayaana samaynaya. Taa macnaheedu waa in xubnaha ururku aysan codayn oo keliya, laakiin ay wax ku leeyiiin, samaynta siyaasadda ururka iyo yoolkiisaba. Mustaqabal waa urur loo siman yahay, oo la wada leehayay.

Urur Siyaasadeedka Mustaqbal [USM] waxa uu ka shaqaynaynaa isbeddel la taaban karo oo ka hir gala geyiga Soomaaliyeed dhammaantiis, kaas oo horseedi doona horumar, sinnaan iyo caddaalad bulshada dhexdeeda ah. Waxaan dooneynaa in uu dhaco isla xisaabtan dhab ah, in la ciribtiro musuq-maasuqa baahay, nin jecleysiga, eexda iyo cudurka laaluushka ee ragaadiyay dhammaan hawlihii dawladnimo.

## QODOBKA 1AAD: MAGACA IYO XARUNTA

Magaca ururka waa Urur Siyaasadeedka Mustaqbal, loona soo gaabiyo [USM].

Xafiisyada ururku waxay noqonayaan;

**A.** Xarunta dhexe ee ururka waa caasimadda Puntland ee Garoowe.


**B.** Xafiisyada gobollada waxaa laga furayaa xarumaha gobollada iyo degmooyinka Puntland.

## QODOBKA 2AAD: CALANKA

**A.** Calanka wuxuu leeyahay laba dhinac.

**B.** Qaybta sare waa midabka Buluugga calanka Soomaaliya oo xiddig cad dhexda ku leh.

**C.** Qaybta hoose waa midab cagaar/ doog ah oo saafi ah.



## QODOBKA 3AAD: ASTAANTA

Astaanta ururka waa goobo qaybta sare midab Buluugga calanka Soomaaliya oo dhexda ku leh xiddig cad iyo miisaan. Qaybta hoose waa midab cagaar ah oo dhexda kaga qoran yahay magaca ururka.

## QODOBKA 4AAD: JIRITAANKA URURKA

Urur Siyaasadeedka Mustaqbal, wuxuu leeyahay jiritaan sharci ah oo madax bannaan, waafaqsanna Dastuurka Puntland iyo xeerka ururada siyaasadda Puntland, wuxuuna ka diiwaan gashan yahay xafiiska Guddiga Doorashooyinka Puntland ee Ku Meel Gaarka ah.

## QODOBKA 5AAD: ARAGTIDA (VISION)

**Aragtida Dowladnimo:** In aan Puntland ka hirgalinno dowladnimo ka horumarsan dhinacyada siyaasadda, dhaqaalaha, amniga, sarraynta sharciga.

**Aragtida Bulshada:** In aan dhisno bulsho ilbax ah, karaamo leh, xor ah, iskaashi leh, saldhiggeeduna yahay ku dhaqanka shareecada Islaamka.

## QODOBKA 6AAD: HIMILADA URURKA (MISSION)

Dhismaha dawladnimo loo dhan yahay, kuna dhisan nidaam uu saldhig u yahay talowadaag, caddaalad, midnimo, saraynta sharciga, baahinta maaamulka iyo adeegga bulshada.

## QODOBKA 7AAD: MABAADII'DA URURKA (PRINCIPLES)

**Ururku wuxuu ku dhisan yahay mabaadii'da hoos ku qoran:-**

**B) Islaamka:** Islaamku waa aasaaska qaab nololeedka ummadda Soomaaliyeed, waana saldhigga dhammaan qawaaniinta dalka.

**T) Caddaaladda iyo Sarraynta Sharciga**: Xaqiijinta dawladnimo ku dhisan sarraynta shariga, caddaaladda iyo sinnaanta bulshada Puntland iyo guud ahaan Soomaaliya.

**J) Midnimada iyo Qarannimada:** Dhawrista midnimada iyo wadajirka dhulka iyo dadka Puntland iyo adkaynta midnimada iyo qarannimada Soomaaliya.

**X) Doorasho wakhtiyeysan:** Waxaan aaminsannahay in habka xukunka lagu gaari karo uu yahay nidaamka xisbiyada badan, doorasho xor iyo xalaal ah oo muddaysan, loona dhan yahay oo keliya.

**KH) Maamul wanaag iyo Isla-xisaabtan:** Waxaan aaminsannahay in lagu dhaqmo maamul-wanaagga, daacadnimo, ammaano, hufnaan, daahfurnaan, isla-xisaabtan, la-dagaalanka eexda, musuqmaasuqa, qabyaaladda iyo ku takrifalka awoodda iyo hantida dawladda.

**D) Nabadda, Horumarka iyo Dhaqaalaha:** Waxaan aaminsannahay taabagelinta nabadda, horumar waara, daadejinta maamulka iyo adeegyada bulshada oo loo siman yahay, xoojinta xorriyadda dhaqaalaha iyo dhawrista bedqabka deegaanka.

**R) Xaqdhowrka Afkaarta**: Waxaan aaminsannahay in la xaqdhowro xorriyadda kala duwanaanshaha afkaarta, haybta, lahjadda, iyo soo bandhigidda aragtiyaha siyaasadeed iyo in loo hogaansamo natiijada doorashada waafaqsan sharciga dalka.

**S) Xuquuqda Aadanaha:** Waxaan aaminsannahay dhawrista xuquuqda aasaasiga ah ee dadka iyo ka hortagga tacadiyada lidka ku ah xuquuqda aadanaha.

## QODOBKA 8AAD: BARNAAMIJ SIYAASADDEEDKA URURKA.

Barnaaijka siyaasadeed ee ururku wuxuu salka ku hayaa qodobbada soo socda:-

| No | Barnaaijka |
|---|---|
| **1.** | Dowladnimo Toosan. |
| **2.** | Amniga iyo Sarraynta Sharciga. |
| **3.** | Sinnaanta iyo Caddaaladda. |
| **4.** | Dhismaha Bulshada. |
| **5.** | Horumarinta Haweenka. |
| **6.** | Tayaynta Waxbarashada. |
| **7.** | Dhaqaalaha iyo Horumarka. |
| **8.** | Adeegga caafimaadka. |
| **9.** | Xuquuqda Aadanaha. |
| **10.** | Daryeelka Deegaanka. |

## QODOBKA 9AAD: QAAB DHISMEEDKA URURKA

Qaab dhismeeeka ururku wuxuu ka kooban yahay:-

- **Shirwaynaha Ururka.**
- **Golaha Aas-aasayaasha Ururka.**
- **Golaha Dhexe.**
- **Gudiga Fulinta.**

Wabillahi Towfiq.